جماعة الصادعون بالحق

# Muxuu Yahay Kitaabkan?

# Shuruux

# معالم في الطريق

Sh. Mustafa Kaamil Muxammad

Kitaabkan waxaa iska leh Jamaacada Al-Saadicuun Bil-Xaq

Xuquuqda daabicidda iyo fidinta waxay u dhowrantahay jamaacada

Waa la faafin karaa qoraalka, iyada oo xigasho la samaynayo,
waxbana aan laga baddalaynin

# ARAR

## Muxuu yahay kitaabka Shuruuxa?

Dhacdooyinkii ugu naxdinta badnaa iyo dib-u-dhicii ugu ba'naa ee soo mara taariikhda Islaamka waxay ahayd riditaankii khilaafadii Islaamka ee Cusmaaniyiinta, ka gadaal markii ku dhawaad laba qarni loo maleegayey shirqoollo iyo dibindaabyooyin aan kala go' lahayn.

Waxaa tilmaamay uur ku taalladaas qoraagii kitaabka [**Muxuu ku khasaaray adduunku burburkii muslimiinta**] Abul-Xasan Al-Nadawi, isagoo yiri:

"Ma ahayn burburkii, guuldarradii, dib-uga-gurashadii hoggaaminta iyo wax qabadka ee ku yimid muslimiinta dhacdo la mid ah kuwii ka dhici jiray taariikhda; sida burburkii dowladaha, maamullada, boqorrada, ilbaxnimada iyo siyaasadaha oo kale .

Dhacdooyinka noocaas ah in badan bay taariikhda caalamka soo mareen, dhacdadaanse -burburka muslimiinta- ma jiraan wax lala barbardhigi karo. Dhacdadaani ma ahayn mid soo booddo ah oo maalin kaliya timid, waxay ahayd mid soo jiitamaysay sanado badan. Waa dhacdo ilaa maanta uusan caalamku siin muhimaddi iyo qiimayntii ay lahayd; waayo waxa uusan haysanin halbeeg sax ah hoogga iyo nasiibdarrada haysata awgeed."

Dhacdadaa xanuunka badani waxay kicisay quluubta qaar ka mid ah muslimiinta kuwaas oo arkay khatarta dhacdadaas, kuna bixisay xamaasad inay u howlgalaan sidii dib loogu taagi lahaa khilaafadii islaamka. Waxaa dhashay dhaqdhaqaaqyo islaami ah kuwaasoo ku baaqaya in loo noqdo ka xukunyeelashada kitaabka Allaah iyo hirgalinta shareecada islaamka.

Hase ahaatee dhaqdhaqaaqyadii islaamka ee yimid dhiciddii khilaafada kaddib maysan hanan inay si sax ah u qiimeeyaan xaddiga waaqica, gaabis kaga jiray xagga aragtida iyo xagga manhajka awgii, taasina waxay keentay in manhajkii ka dhashay gaabiskaa uu isna noqdo mid gaabis ah.

Waxaa la oran karaa Sayid Qudub ayaa ah kan Allaah uu waafajiyey qiimeynta sugan ee waaqica, sidaa ayuuna ku haleelay aragtida saxda ah iyo manhajka u dhigma daweynta waaqicaa, Ustaad Sayid oo ku bilaabay noloshiisa xarakinimo ku biiridii xarakada Ikhwaanka ayaa gudagalay inuu xaqaa'iqda islaamka uga daraaseeyo Qur'aanka kariimka ah si toos ah, isagoo ku miisaamay waaqaca hortiisa yaal miisaankaa aan marna khaldameyn (Qur'aanka). Taasina waa waafajinta Allaah, waayo xaqiiqada uu ku hanuunay kuma hanuuno qof miisaankiisa iyo halkuu wax ka qaadanayo ka dhigta Qur'aanka mooyee isagoon wax kalana ku qaseyn, taasina waa tan uu Sayidku kaga hormaray culumadii kale, kuwaasoon awoodin inay qiimeeyaan waaqica caalamka islaamka dhabnimadiisa, aanna ku hanuunin manhaj sax ah. Waxaa laga fili karay culumadaa inay noqdaan kuwa soo dhaweeya manhajkaa uu ustaad Sayid soo bandhigay kuwa ugu horeeya, inuu yahay manhajka ku habboon waaqicaan darteed.

Manhajka dacwada ee uu soo bandhigay ustaad Sayid wuxuu ahaa mid ka dhashay yaqiintiisa inuusan aheyn habowga ummaddu mid kooban oo fudud ooy ku filantahay karkarid iyo

hagaajin yar, sidaa awgeed ayuu dadka u caddeyey in halka sartu ka quruntay tahay tiiyoo dadku dib ugu laabteen jaahilayddii islaamku kasoo saaray, xataa kuwa ku nool dhulkii bari islaamku ka talin jiray.

Waqtigu wuxuu dib ugu laabtay maalintii uu diinkana ula yimid aadanaha kalimadda –ilaah aan Allaah aheyn ma jiro-. Dadkii waxay dib ugu noqdeen cibaadada addoomada, iyo caddaaladarrada diimaha, weyna u dhabar jeediyeen kalimaddii towxiidka, walow ay qolooyin kaga dhawaaqayaan masaajidda iyagoon garaneyn macnaheeda iyo waxa ay u jeeddo toona, wuuna ku celcelinayaa asagoo ka raali noqday sheegashada xaqa xukun dajinta ee addoomeda, taasoo macnaheedu yahay sheegasho ilaahnimo. Waxaa eg inay qof ahaan u sheegtaan, ama goloyaal sharci dajin u sheegtaan amaba ummad ahaan u sheegtaan dhammaan waa isku mid, waayo idan uma heystaan xaqa xukun dajinta. Dadkii way ka tageen towxiidkii, mar hadday siiyeen sifaadkii ilaahnimo addoomo kale.

Dhammaan bani'aadamku jaahiliyo ayey isgu dhurteen oo ay ku jiraan kuwan masaajidda kaga celcelinaya kalimadda towxiidka: "Laa ilaaha Illallaahu" iyadoon laheyn wax macne iyo ku dhaqan toona. Kuwani iyagaa ugu dambi badan uguna cadaab kulul maalinta qiyaamo, waayo waxay u noqdeen cibaadada addoomada- kaddib kolkii uu hanuunku u caddaaday iyo iyagoo ahaa kuwo ku noolaan jiray diinta Allaah!

Sidoo kale ustaad Sayid wuxuu yaqiinsanaa in bilowga saxda ahi yahay fahamka jaahilinimada mujtamacaadka iyo mujatac Muslim ah uusan joogin dunida.

"Muslimiinta u halgameysa dhab ugu soo celinta diintan adduunka, waxaa waajib ku ah inay si cad oo xeeldheer u yaqiinsanaato xaqiiqdaasi-jaahilinimada mujtamaccadka-oo aysan ka labalabeyn kuna tilmaanto dadka waxa xaqiiqadoodu tahay. Taas waa barta bilowga iyo ambaqaadka. Haddiise xarakadu ka weecato xaqiiqadaas in yar waxay ka lumeysaa dariiqa oo dhan, waxayna dhisaysaa wax aan asaas laheyn si kastoo ay u kulansato daacadnimo, dhabar adeyg iyo ku mamannaanta dacwada[1].

Waxaa kaloo uu yaqiinsanaa in halka dacwada dadka looga bilaabayaa tahay iyadoo dib loogu yeero towxiidka:

"Waxaa loo baahan yahay ducaadda dadka ugu yeeraya Islaamka inay uga bilaabaan caqiiddada xataa kuwa isu haysta inay muslimiin yihiin oo warqadda dhalashadoodu u qirayso muslinnimo. Waa inay u sheegaan in Islaamku yahay marka ugu horreysa inay qiraan kalimadda "laa ilaaha illallaahu" macnaheeda runta ah kuna qiraan damiirkooda, cibaadadooda iyo hab nololeedkooda, caqiiddadaas oo ah in Allaah xukunka kaligii loo daayo, lagana faramaroojiyo kuwa sida gardarrada ah u sheeganaya awoodda xukunka"[2].

Wuxuu yaqiinsaday in dariiqa kaliya ee lagu gaari karo mujtamac muslim ah uu yahay dhisidda jamaaco islaami ah oo xubnaheeda leh.

Wuxuu ustaad Sayid ku oranayaa kitaabkiisa (**Islaamka iyo mashaakilka ilbaxnimada**):

"Waxay howshu ku bilaabataa xaqiiqadaan oo gasha qof ama dhowr qof qalbigood, kaddibna kooxdu ku dhaqaaqdo dariiqa dheer ee dhibka badan ee ku cusub dadka maanta – in yar

١ معالم في الطريق

٢ في ظلال القرآن ١٠١١

mooyee- sidii uu berigii Islaamku yimid u cusbaa, kaddibna geeddigu ugu dambayn gaaro dhammaadka dhabbaha sidii kii horeba u gaaray.”

“Aadanuhu dheg jalaq uma siiyo manhaj qoraal ama maqal uun ku eg, wuxuu aqbalaa manhaj nool oo jamaaco dadka ka mid ah noloshooda ku tarjumeen, kaasoo ishu arki karto, gacantuna taaban karto, caqliguna raadkiisa haleeli karo. Waxa uu aadanuhu ku aqbalayaa Islaamka markii uu mujtamac ku dhaqmaa jiro.”

Sayid Qudub -Allaah ha u naxariistee- wuu u caddeeyey guud ahaan dadka gaar ahaana Ikhwaanka fikradiisaan, wuxuuna ku qoray kutubtiisa kala duwan gaar ahaan Dilaalka iyo Macaalimka.

Waxaa dheeraa qoraaladiisaas in Sayid Qudub kula kulmay xabsiga xubno ka tirsan Ikhwaanka, una sharxay dacwada Qur’aanka iyo in caalamku noqday jaahili, lagama maarmaanna tahay in dib loogu howlgalo dhismaha mujtamac islaami ah, waayo waa dariiqa kaliya ee lagu dhisi karo dowlad islaam ah oo isu keenta muslimiinta una suuragalisa ku dhaqanka diintooda uu Allaah uga raali noqday sida uu Allaah yiri:

﴿ وَعَدَ اللَّهُ الَّذِينَ آمَنُوا مِنْكُمْ وَعَمِلُوا الصَّالِحَاتِ لَيَسْتَخْلِفَنَّهُمْ فِي الْأَرْضِ كَمَا اسْتَخْلَفَ الَّذِينَ مِنْ قَبْلِهِمْ وَلَيُمَكِّنَنَّ لَهُمْ دِينَهُمُ الَّذِي ارْتَضَى لَهُمْ وَلَيُبَدِّلَنَّهُمْ مِنْ بَعْدِ خَوْفِهِمْ أَمْنًا يَعْبُدُونَنِي لَا يُشْرِكُونَ بِي شَيْئًا ﴾ [النور:٥٥]

“Allaah wuxuu u yaboohay kuwa idin ka mid ah ee rumeeyey, wanaaggana falay inuu makaninayo (ugacan gelinayo) dhulka sidii uu u makaniyey kuwii iyaga ka horreeyey, wuu makaninayaa diintooda uu uga raalli noqday, wuxuuna ugu beddeli doonaa cabsidooda kaddib amni. Way i caabudayaan iyagoon wax ila wadaajineyn”. (Al-Nuur: 55)

Sida aan ognahay, aad bay u kala duwan yihiin inaad akhriso farriin sheekhaaga kaaga timid ama midka ku tarbiyeynaya iyo inaad la noolaato sheekhaas oo aad kala kulanto tarbiyada si toos ah, lana falgasho hadalladiisa, kuna dayato, weydiisana wixii kaa dheehgala. Haddii aan aragnay raadka erayada ustaad Sayid ku yeesheen inta badan kuwa ku howlan dhaqdhaqaaqa islaamiga ah, iyo badnaanta kuwa jecel ee ka helay qoraalladiisa xulka ah, sidee bay noqonayaan ardaydiisii la kulantay ee uu islaamka u sharxay, si toos ahna u tarbiyeeyey?

Kuwaa uu Allaah nicmadaa siiyey waxaa ka mid ah Sheekh Mustafa Kaamil Maxamed- amiirka jamaacada “Al-saadicuuna bil xaqi” wuxuuna sharxay kitaabka Macaalimka.

Sheekh Mustafa Kaamil wuxuu kaga warramay noloshiisii Ikhwaanka iyo la kulankiisii ustaad Sayid xusuus qorkiisii uu ugu magic daray “**Aniga iyo Sayid Qudub**”.

Sheekh Mustafa wuxuu fahmay dacwada Qur’aanka, wuxuuna si qoto dheer u gartay jirrada aadanaha maanta, wuxuuna yaqiinsaday dawada kaliya ee ay leedahay inay tahay u noqoshada Rabbigeed. Wuxuu kaloo yaqiinsaday inay la gudboon tahay xarakaadka islaamiga ah inay qaataan fikraddaan iyo in aysan u habbooneyn qof Muslim ah oo xaqan ku hanuunay inuu ka gaabiyo waajibnimada dacwada islaamka.

Taasina waa tan ku bixisay inuu sharxo kitaabka macaalimka; kaasoo asaaska u dhigay qorshaha dhaqdhaqaaqa dib u soo nooleynta islaamka waqtigan. Cadowga islaamku waxay dareemeen khatarta kitaabka Macaalimka waxay ku magacaabeen (Bayaankii xarakaadka islaamiga).

Kitaabka Shuruuxa Macaalimka ee na horyaalla maaha mid la mid ah sharxidda kutubta ee la yaqaanno. Waa mid gaar ah. Ka badbadisna maahee waa arrin uu arki karo qof kasta oo akhriya ama daraaseeya.

Waana kan qaar ka mid ah wixii ka dhigay inuu gaar noqdo:

**Tan koowaad**: Sheekha sharxay kitaabka waa ardaygii qoraaga kitaabkan, isagoo dareemaya in macallinkiisu siiyey haddiyaddii ugu weyneyd nolosha. Miyey jirtaa nimco iyo siismo ka weyn in laguugu kaalmeeyo inaad diinta Allaah si sax ah u fahamto, ood rumeyso diyaarna u noqotid inaad wax walba u hurto diintaa Allaah dadka u doortay.

Wada noolaashadaa dhabta ah ee dhexmartay Ustaadka iyo ardaygiisa, iyo ka qaadashada tooska ah xaqaa'iqda diintan, iyo ka caddeysashada iyo la tashiga Ustaadkiisa caqabad kasta oo uu ka fili karo dariiqa dacwada… Fursadahaa gaarka ah waxay ka dhigeysaa ardayga kan ugu mudan haleelidda ujeedooyinka kalimaadka iyo oraahyada Ustaadka ee kutubbadiisa kala duwan, isagaa mudan inuu sheego si tafatirin xaqiiqadii dacwada Ustaadka iyo ujeedooyinkiisii; sidaa awgeed qoridda ardaygan ee kitaabka shuruuxa macaalimka waxay ka dhigeysaa sharax gaar ah oo tilmaaman.

**Tan labaad**: Qoraaga shuruuxa wuxuu dhisay jamaaco u heellan soo celinta ummaddii muslimka aheyd, waana talalabada ugu horreysa soo celinta khilaafadii, isagoo ka tilmaan qaatay Macaalimka. Taasi waxay u furtay aragtiyo waaweyn oon u furmeen haddii uu meel la fariisan lahaa cilmigii uu sheekhiisa kala kulmay. Sharaxani waa mid ku dhisan waayo aragnimo dheer oo qoraaga shuruuxu ka dhaxlay dhismaha jamaacadaa uu u huray ruuxdiisa, caqligiisa iyo waqtigiisa oo idil.

**Tan saddexaad**: Qoraaga shuruuxu wuxuu tarbiyeeyey jamaacadan tarbiyo dhammeystiran oo taabatay dhinacyada nolosha oo dhan, ha ahaato caqli ahaan, feker ahaan, ruux ahaan, cilmi iyo aqoon ahaan, bulsho ahaan, akhlaaq iyo dhaqan ahaan, dhaqaaq iyo dacwo gudasho ahaan. Waxaa hubaal ah in tarbiyada uu qof tarbiyeeyo cid kale ay isaga laftiisa u tahay tarbiyo sida uu garanayo qof kasta oo fikrad u nool, dadkana ugu yeera, iskuna daya inuu ku tarbiyeeyo ciddii soo raacda.

**Tan afaraad**: Tarbiyada jamaacadan waxay qaadatay afartan sano wax ka badan, waana waqti dheer oo u suuragaliyey qoraaga shuruuxa barashada laablaabyada iyo kurtumaha nafta aadanaha, iyo waxa ku bixin kara inay sare u kacdo. Marka aad akhriso shuruuxa waxaad arkeysaa qoraagu inuu yahay caalim ku xeel dheer tarbiyada aadanaha iyo daweynta cilladahooda, kuna dadaalaya nadiifinta nafta inteeda muuqata iyo teeda qarsoon…

Xagga muuqaalka, Sheehku wuxuu ku dadaalayaa in daaciga muuqaalkiisu noqdo mid ka qeyb qaadanaya ku soo jeedinta indhaha dadka bilicda islaamka. (إن الله جميل يحب الجمال) (Allaah waa qurxan yahay, quruxdana wuu jecel yahay) (الطهور شطر الإيمان) (Isdaahirintu waa iimaanka barkii). Sidaa awgeed waxaad arkeysaa qoraagu inuu aad uga hadlayo arrimo la xiriira huga iyo hubqaadka iyo ahmiyadda ay u leedahay qofka daaciga.

Dhinaca kalena wuxuu ku dadaalayaa in uu daacigu noqdo qof naftiisu saafi tahay, sirtiisuna wanaagsan tahay, ka badqaba jirrooyinka qalbiga, ayna ka buuxaan dareen aadminimo oo sare, la jecel wanaagga dhammaan aadanaha, Allaah dartii u jecel walaalihiisa mu'miniinta ah…

Dadaalkaa waqtiga dheer ee aan kala go'a laheyn ee loo galay tarbiyeynta dadka iyo himmadaa sare ee isku dayga gaarsiinta nafta aadanaha kaamil ahaanshaheeda... waxay siisay shuruuxa dhadhan macaan iyo sanuun gaar ah oo aan meel kale laga heleyn.

**Tan shanaad**: Sheekhu wuxuu ku dadaalay dhisidda wacyiga jamaacada oo ku aaddan dabeecadda loolanka u dhaxeeya xaqa iyo baadilka. Durbadiiba waxaa akhristaha shuruuxa u muuqanaya dadaalka uu ku bixiyey qoraagu ku wacyigalinta xubnaha jamaacada waxa hareerahooda ka socda iyo dabinnada cadowgu u maleegayo siduu nolosha dadka uga siibi lahaa xaqiiqada islaamka, iyadoo loo reebayo hummaag beeneed si dadweynuhu ugu dagmaan una maleeyaaan in islaamku weli dhaqan yahay!!!

Cadowgu waxaa kaloo isku dayey siduu xarakaadka islaamiga ah qaarkood ugu leylin lahaa in meel dhexe la isugu yimaado oo lagu shaqeeyo wadiiqadaha jaahiliyadda si xarakaadku u gaaraan ujeedooyinkooda, dhanka kalana si bahalnimo ah kula dhaqmo xarakadii uu ka uriyo faham sax iyo raacidda manhajkii lagu soo celin lahaa mujtamac iyo dowlad muslim ah, ilaa ay dadku naftooda u baqaan, culumadiina ay noqdaan mid aamusa oo isku qanciya inuu ku jiro halkii iimaanka ugu hooseysay iyo mid isdhiiba oo ku cudurdaarta marna "labo daran kii fudud" iyo marka kale "kala rajixidda maslaxada iyo dhibka"

Waxaa xusid mudan in sheekhu u adeegsaday tarbiyada jamaacada iyo baraarujinteeda sharaxa kitaabka macaalimka. Kitaabka shuruuxu asal ahaan wuxuu ahaa muxaadarooyin uu sheekhu u jeediyey qeybo kamid ah jamaacada oo la duubay kaddibna qoraal loo rogay.

Halkan waxaan oran karnaa in shuruuxu ka sameysantay dadaalkii dheeraa iyo dhibkii la soo maray waqtiyo kala duwan, laga soo bilaabo la kulankii ustaad Sayid, ku tarbiyeynta jamaacada sannado badan fikradihii lagu soo bandhigay shuruuxa, kaddib duubistii tijaabadaas si uu u soo gudbiyo sheekhu wixii qalbigiisa ku jiray oo dareen ah, wixii aragtiyo iyo afkaar ahaa ee caqligiisa ku jiray, iyo wixii naftiisa degay ee ka dhashay la noolaashada dheer ee Qur'aanka iyo xaqiiqada ilaahnimada, iyo waayo aragnimo ka dhalatay tarbiyeynta dadkii kala duwanaa ee loo soo xulay dacwada, oo mid waliba u baahnaa tixgalin gooni ah iyo fahmidda nafsiyaddiisa si la isugu dayo in la gaarsiiyo martabad sare. Ugu dambeynna qoraal loo rogay duubistaa si ay u noqoto wax loo noqon karo lagana faa'ideysan karo.

Ka hor gabogabeynta hordhacan, waxaan halkan ku muujineynaa tusaalooyin muujinaya dabeecadda shuruuxa iyo qaabka qoraagu uga hadlay arrimaha uu ku soo bandhigay ustaad Sayid kitaabka Macaalimka. Tusaalooyinka waxaan ka arki doonaa wixii aan horey u soo sheegnay ee ahaa in qoraagu (ardaygu) yahay kan ugu mudan inuu sharxo caddeeyana wixii uu soo koobay Sayidku. Ardaygu wuxuu daraaseeyey kitaabka Macaalimka markuu ahaa gacan-qoraalka, wuxuuna si toos ah uga qaatay ustaad Sayid sida loo fulinayo qorshaha xarakada ee uu Sayidku ku soo bandhigay Macaalimka, oo lafahaantiisu isku dayey inuu diyaariyo tarbiyeeyana racii koowaad ee noqon lahaa unugga horseedayaasha iyo hoggaamiyayaasha soo nooleynta islaamka, kuwaas oo uu u qoray Macaalimka si ay ugu caddaato kaalintooda iyo xaqiiqada howshooda.

Bal aan dhuganno macnaha erayadan kooban ee uu ku qoray ustaad Sayid hordhaca kitaabka Macaalimka:

**"Horseedyaashaan go'aansaday inay u istaagaan dacwada waxaa lama huraan u ah inay helaan "tusmooyinkii dhabbaha", tusmooyin ay ku gartaan kaalintooda, xaqiiqada howshooda iyo gunta ujeedkooda, halka ay ka bilaabayaan geeddi socodkooda, sidoo kalena**

**ay ku gartaan mowqifkooda jaahiliyaddan dhulka oo dhan hareysay... Dadka maxay isugu imaan karaan maxayse ku kala tagayaan? Waa maxay tilmaamaheeda gaarka ah? waa maxayse tan u gaarka ah jaahiliyadda ku hareereysan? Maxay kula hadleysaa jaahiliyadda, sideebayse luqad islaam ugula hadleysaa? Waxaas oo dhan xaggee bay ka qaadaneysaa sideese u qaadaneysaa?"**

Tusmooyinkaa waa in laga qaataa asalka koowaad ee caqiiddadani leedahay... Qur'aanka... iyo tusaalooyinkiisa asaasigaa iyo aragtidii uu ku beeray xulkii la doortay, kuwaasoo Allaah uu ku xaqiijiyey dhulkan dhexdiisa wixii uu doonay, kuwaasoo u beddelay socodka taariikhda halkii uu Allaah la doonay

Sidoo kale bal eeg sida Allaah u waafajiyey qoraaga (ardayga) caddeynta iyo kala dhigdhigidda wixii uu soo koobay (ustaadkiisu):

(Horseedyaashaan go'aansaday inay u istaagaan dacwada waxaa lama huraan u ah inay helaan "tusmooyinkii dhabbaha", tusmooyin ay ku gartaan kaalintooda…)

**Tusmada ugu horeysa** ee ay tahay inay gartaan horseedayaalku waa (kaalintoodu waxay tahay); Kaalintoodu waa hoggaamin; dadka oo xagga Allaah iyo hanuunka loo hoggaansho, iyo inay gartaan inay u xilsaaran yihiin howl aad u weyn oo mug leh, sidaa awgeedna aysan fududeysan ama yareysan naftooda…

**Tusmada labaad**: (waa xaqiiqada howshooda); howshoodu waa inay diinta dadka gaarsiiyaan, iyo inay isku dayaan xaqa inay dadka ku hanuuniyaan. Shaqadoodu waa taa; waana shaqo aadane qabto tan ugu weyn, waana howshii nabiyada (cs)

**Tusmada seddexaad**: Inay gartaan (nuxurka ujeeddadooda) Waana Allaah oo addoon loo noqdo.

**Tusmada afaraad**: Waa inay gartaan (Geeddi-socodka dheer halka uu ka bilaabmayo); waana caqiiddada, Waa inuu ahaadaa bilowgu had iyo jeer qaddiyadda caqiiddada iyo qaddiyadda kalimadda towxiidka.

**Tusmada shanaad**: Inay gartaan (Qaabka uu noqonayo mowqifka ay ka istaagayaan jaahiliyadan arlada dhan ku habsatay) Waa ka-soocanka jaahiliyadaa iyo inay xaddidaan mowqifkooda iyagoo ku muujinaya kalabaxa iyo ka-soocanka jaahiliyadda.

**Tusmada lixaad**: Sidoo kale inay gartaan (maxay dadka ku kulmayaan? Maxayse ku kala tagayaan?) waana qadiyadda Al walaa wal baraa'. Inay gartaan habkey u dhaqmayaan, iyo siday u jeclaanayaan, maxayse yihiin qodobbada lagu kulmi karo iyo kuwa lagu kala tagayo. Dhammaan arrimahaas waxaa xaddidaya oo sal u ah al walaa wal baraa' oo lagula dhaqmo jaahiliyadda.

**Tusmada toddobaad**: Sidoo kale inay gartaan (waa maxay tilmaamahooda gaarka u ah, waa maxayse tilmaamaha gaarka ah ee jaahiliyadda hareerahooda ah) waana midda aan ku sheegnay garashada waaqica. Waxaa lagama maarmaan u ah horseedayaalka inay aad u fahmaan waaqica; inay gartaan tilmaamahooda, kaddib ay gartaan tilmaamaha jaahiliyada hareerahood ah. Kaddib ay u xaddidnaato inta ay isu jiraan iyaga iyo jaahiliyaddu, iyo halka ay ka howl bilaabayaan iyo sidey ula dhaqmayaan jaahiliyadda.

**Tusmada sideedaad**: Inay gartaan (Sideebay luqadda islaamka ugula hadlayaan jaahiliyadan? Maxayse kula hadlayaan?) Waana manhajka. Waa inaan garannaa qaabka aan ula hadleyno jaahiliyadan. La hadal kastaahi maaha mid habboon, bilow walbaana sax maaha, dariiqad

walbaana na gaarsiin mayso inay jaahiliyadu fahamto waxa aan ugu yeereyno. Waana taa midda kala saareysa xarakaadka islaamiga ah.

**Tusmada sagaalaad**: (inay gartaan halkeen waxaas oo dhan ka qaadaneynaa? Sideebaanse u qaadaneynaa?). Waa xaddidaadda halka wax laga qaadanayo iyo manhajka lagu qaadanayo, waana arrin aad muhiim u ah.

Ugu dambeyn **tusmadii tobanaad**: Inay gartaan (sideebuu islaamku ugu abuuray xulkii la doortay - Saxaabadii ah- isbeddelkaas oo dhan. Xulkaa uu Allaah ku xaqiijiyey dhulkan dhexdiisa wixii uu doonay, xulkaas oo u beddelay khadka taariikhda halkii uu Allaah doonay.

Saxaabadu waa tusaalaha aan dulsaareyno xaqaa'iqda islaamka si aan u aragno sideebay ku soo baxeen kuna dhismeen si waaqic ah?

Waxaan arkeynaa sidee buu Cumarkii (RC) qalafsanaa ee adadkaa, dilaaga ahaa islaweynaa, isugu beddelay ninkaa caalimka ah, Alle tilmaanka ah, naxariista badan, ee hoggaamiye maamul wanaagsan ah. Sidee buu Khaalid bin Waliidkii cadowga islaamka ahaa ugu beddelmay seeftii Allaah ee galka ka baxsaneyd?

Ma kuu caddaatay dabeecadda shuruuxa? Mase garatay usluubka qoraaga ee ku aaddan faahfaahinta arrimaha uu soo koobay Sayidku?

Bal aan soo qaadanno tusaale kale oo aad u caddeynaya sida qoraagu u kala dhigdhigay wixii uu soo koobay ustaadkiisu.

Ustaad Sayid wuxuu oranayaa mar uu ka hadlayey qadiyadda marxaliyada ee manhajka dacwada cutubka *Aljihaad* dhexdiisa:

**Astaanta labaad: waaqicinnimada dhanka dhaqdhaqaaqa ee diintan**

**(waa xarako ama dhaqdhaqaaq leh heerar, heer walbana wuxuu leeyahay wadiiqo u gaar ah oo u dhigma waxyaabaha uu keensanayo iyo baahidiisa dhabta ah, heer walbana wuxuu usii dhiibayaa heerka ku xiga. Waaqacana kuma qaabilayo aragtiyo qayaxan, heerarka waaqacaasna kuma qaabilayo wadiiqo aan is bedelin)**

Qoraagu wuxuu faahfaahiyey biyodhaca erayada mugga leh ee ka hadlaya qaddiyadda ugu muhiimsan oo ay tahay in xarakada islaamiga ah mowqif ka qaadato si ay yoolkeeda u gaarto; waana qaddiyadda marxaliyadda (heerarka).

Hoos u eeg qoraallada aan kasoo qaadannay sharaxii qoraagu(ardaygu) faahfaahiyey si uu u caddeeyo ujeeddooyinkii ustaadkiisu ka lahaa weedhan kooban.

Wuxuu oranayaa qoraagu:

"Waa kaa waxa loola jeedo inuu manhajku yahay mid marxalado leh; marka uu kasoo dhaqaaq bilaabayo gunta hoose ilaa dhakada sare, ama barta bilowga ilaa barta dhammaadka wuxuu marayaa marxalado kala duwan, marxalad walbaan leedahay ujeeddooyin gaar ah, waxay kaloo leedahay axkaam waafaqsan ujeeddooyinkaa, iyadoo wax ka qabaneysa baahiyaha marxaladdaas... Sidaa awgeed waa inay leedahay jamaacada muslimadda ahi fiqhi xarakadeed oo la jaanqaadi kara dabeecadda marxaladda, ujeeddooyinkeeda iyo baahiyaheeda iyo sidoo kale caqabaadka marxaladda, iyo wax allaale waxa ay keensaneyso marxaladdaasi oo garasho iyo faham ah, si ay ugu suuragasho inay shareecada Allaah kala soo baxdo axkaam waafaqsan marxaladdaas". "Waana waxa loola jeedo marxaliyada aan ka sheekeyneyno"

Waxaa hubaal ah tijaabadii ugu dambeysay ee dhammeystiran, xafidanna, hor taallana dadka ilaa qiyaamaha, inay tahay tii uu fuliyey rasuulku (SCW); nabigii ugu dambeeyey nabiyada, Allaahna uu ku xaqiijiyey gacmihiisa dhaqan gelinta diintaan si dhameystiran; aragti ahaan, manhaj ahaan, xarako ahaan, dhaqan iyo akhlaaq ahaan…

Waa tijaabada kaliya ee quruxda badan ee mudan in muslimiintu ku daydaan, si dhameystiranna ugu xirmaan, tallaabo tallaabana u raacaan. Sida rasuulku (SCW) uga billaabay meel eber ilaa uu gaaray dhammaadkii ayey tahay in xarako kasta oo joogta maanta ay ka bilowdo isla billowgii si ay u gaarto isla dhammaadkii haddii Allaah uu u idmo, iyadoo mareysa marxaladihii uu maray rasuulku (SCW). Sidaa awgeed baahi weyn ayey u qabaan xarakaadku inay fahmaan marxaliyada sidii Nabigu (SCW) u fuliyey goortii uu Maka ka bilaabay inuu si sir ah ugu yeero dadka ilaa uu furtay Maka oo guushii islaamku dhabowday ugu dambeyntii, kaddibna Allaah uu ku fidiyey islaamka dhulalkii waqtigaa jiray kuwii ugu fogaa".

Macnaha marxaliyaddu waa inaan garanno heerarkii islaamka iyo dhaqdhaqaaqiisu soo maray, iyo sidii uu u fuliyey rasuulku (SCW).

Ugu dambeyn waxaan ku soo hoorineynaa tusaaleyaashaa faalladan qurxan ee uu soo bandhigay qoraagu si uu u caddeeyo waxyaalaha laga dheehan karo cinwaanka cutubka koowaad "Jiilkii Qur'aanka ee fariidka ahaa"

Qoraagu wuxuu yiri: Waxaan ka hadlaynaa cutubka koowaad ee kitaabka tusmooyinka dhabbaha, waana cutubka (Jiilka Qur'aanka ee fariidka ah). Waxaan aad u raacraaceynaa cutubka si aan u haleelno nuxurka kalimad kasta iyo oraah kasta iyo xaqiiqa kasta, aanna isku dayno inaan la noolaanno oo aan ka helno tusmooyin noo caddeeya xaqiiqada uu ka hadlayo cutubku iyo aragtida uu ka hadlayo qoraaga kitaabka "Tusmooyinka."

Waxaan shaki ku jirin in cinwaanka ah "Jiilkii Qur'aanka ee Fariidka ahaa" uu xambaarsan yahay dareen iyo duruuf gaar ah oo xiisa galineysa, raadna ku reebaysa nafta dadka doonaya inay maskaxdooda dib ugu soo celiyaan, isla markaana weheshadaan tijaabadii gaarka ahayd ee uu hirgaliyay nabigu (SCW) maalin maalmaha ka mid ah.

Magaca Jiilkan Qur'aaniga ah oo kaliya ayaa ah mid soo jiidanaya qalbiga, kuna reebaya raad hilow badan, waana sababta uu cutubkani ugu muhiimsan yahay kitaabkan, haba ugu muuqato dadka qaar in arrimaha looga hadlayo cutubyada kale ay kasii muhiimsan yihiin.

Waxaan shaki ku jirin in cutubkaan asaas u yahay cutubyada soo socda oo dhan; maxaa yeelay cutubkani wuxuu ka hadlayaa kitaabkii ay ka dhasheen xaqiiqooyinka laga hadli doono oo dhan (oo ah kitaabka Qur'aanka). Cutubyada ka dambeeyana waxaa la dhihi karaa waxay faahfaahin iyo caddeymo u yihiin cutubkan.

Marka aan ka hadleyno jiilkan Qur'aaniga ah, waxaan ka hadleynaa Qur'aankii laftiisa oo ka soo muuqday nolosha jiil dadka ka mid ah, arrintaasina waa arrin weyn oo aan sahlaneyn, waana arrinta cutubkaan siinaysa muhimadda gaarka ah; sababtoo ah jiil kasta oo iimaan Allaah siiyay, isla markaana doonaya Allaah iyo rasuulkiisa, waxay ku hamminayaan oo tiigsanayaan sidii ay u noqon la haayeen jiilka Qur'aanka loogu magac daray.

Sidaa awgeed haddii aan si fiican u fahamno cutubkaan, oo aan si fiican u dhuuxno, kaddibna aan ku dhaqanno, oo ay nolosheenna ka mid noqoto, waxaan ku guulaysanay inaan gooyno jidka kala barkiisa, waxaana ka gudbaynaa hagardaamada taal jidkan qeybo ka mid ah.

Xaqiiqooyinka kale ee uu kitaabkaan ka hadlayo waxay noo noqon doonaan sii adkeyn wixii aan ka fahamnay cutubkaan muhiimka ah, gaarkana ah, islmarkaana cajiibka ah.

Haddaba la socod wanaagsan cutubyada kitaabkan xiisaha badan.